



## Dadka Aad la Xidhiidho ee ka Baxsan Aagga

Haddii aad kala luntaan adiga iyo gacalkaagu ama dadka aad jeceshahay marka masiibo dhaedo, waxa aad u baahan doontaa inaad heshid hab aad ku ogaatid meesha ay joogaan. Wuxuu laga yaabaa in giisanaanta ama kurbada dhacdadu ay dhib ka dhigto inaad xusuusatid xiita maclumaad caadi ah, sida lambaro teleefon.

Qof kasta oo qoyska ka tirsan waa inuu boorsada jeebka, boorsada lacagta ama boorsada dhabarka ku haysto wakhti kasta kaadh uu ku qoran yahay qof lala xidhiidho oo ka baxsan aagga.

Waxyabaha la sameeyo ka hor inta aan masiibo dhicin

- Weydiiso qof qoyska ka tirsan oo ka baxsan aagga ama saaxiib aagga ka baxsan inuu noqdo qofkaaga la-xidhiidhistaa. Waa in qofkani ku noolaado ugu yaraan meel kuu jirta 100 mayl. Wuxuu dhici karta inay dhib noqoto in la sameeyo wicitaano degmada ah sababta oo ah dad badan ayaa laga yaabaa inay isku wakhti isticmaalayaan khadadka teleefonada. Hase yeeshi, wuxuu aad awoodi doontaa inaad sameysid wicitaano meel fog.
- Samee kaadhadh yaryar oo ay ku qoran yihiin magaca iyo lambarka teleefonka oo ay dhammaan xubnaha qoysku ku qaataan boorsada jeebka, boorsada lacagta ama boorsada dhabarka.
- Hayso teleefon aan u baahnay koronto si uu u shaqeeyo. Teleefonada bilaa xadhigga ah waxay isticmaalaan koronto—haddii korontadu go'do, ma shaqeeyn doonaan!

La-xidhiidhistaa gacalkaaga ka dib masiibooyin

- Dhammaan xubnaha qoysku waa inay wacaan qofka la-xidhiidhistaa ee ka baxsan aagga. Qofka la-xidhiidhistaa wuxuu uu warka ka qaadi doonaa qof kasta oo qoyska ka tirsan, meesha ay joogaan iyo sida loola xidhiidhi karo.
- Wuxuu laga yaabaa inaad awoodid inaad fariimo qoraal ah (text) u diri kartid kuwa aad jeceshahay ama gacalkaaga oo aad ka diri kartid teleefonkaaga gacanta. Fariimaha ka dhig kuwo gaaban.
- U hubso in gacmaha teleefonadaadu ay saaran yihiin salka teleefonada ama teleefonku isa saaran yahay—inta lagu jiro dhacdooyinka sida dhulgarir wuxuu dhici karta in gacantu ka boodo salka teleefonka. Haddii tiro badan oo ah teleefono aanay gacantu saarnayn, wuxuu laga yaabaa in adeegga teleefonka ee degmadu si sax ah u shaqeeyn waayo.
- Waa inaad awoodid inaad isticmaashid teleefonka lacagta lagu rido ee dibadda haddii teleefonkaaga gurigu shaqeeyn waayo. Teleefonada lacagta lagu rido waxay ka tirsan yihiin shabakadda adeegyada degdeggaa, waxana ay mudnaan ama tixgalin u leeyihiin in hore loo hagaajiyoo si ay u shaqeeyaan. Sunuudda ama lacagta macdanta ah ee loo baahan yahay in lagu isticmaalo teleefonka lacagta lagu rido ku dheji kaadhkaaga la-xidhiidhistaa qofka ka baxsan aagga.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-046  
Somali

Kaadha qofka la-xidhiidhistaa ee aagga ka baxsan

Kaadha qofka la-xidhiidhistaa ee aagga ka baxsan. Kaadhkan koobiyo uga samee dhammaan xubnaha qoyska. Qof kasta ha ku qoro warka la-xidhiidhistaa ee qoyskaaga oo ku rid kaadhadhka boorsadooda jeebka ama boorsadooda lacagta.

(Goo muuqaalka kaadhka, isku laab si uu u galo boorsada jeebka.)

 <a href="http://www.emd.wa.gov">www.emd.wa.gov</a> Name (print): _____	<b>OUT OF AREA CONTACT PERSON</b> <b>WHY?</b> Local phone systems may be shut down in a disaster. However, you frequently can place a long-distance call.  <b>Phone number (with area code):</b> _____  <b>Cell phone number (with area code):</b> _____  <b>TIP:</b> You may be able to text message all your loved ones on your cell phone. Keep these messages short.
<b>Disaster meeting place (if I cannot return home):</b>  EXACT LOCATION _____	<b>Meeting place in case of house fire:</b>  EXACT LOCATION _____
<b>In case of local emergency, contact:</b>  PRINT NAME _____ PHONE _____	